# Iibinta ama Bixinta Cuntooyinka Deegaanka Ka baxa oo lagu Baxsho Xarumaha cuntada

Xarumaha cuntada sida maqaayadaha, dukaannada cuntada, kaydadka cuntada iyo barnaamijyada qadada dugsiga ayaa sharciyan iibsan kara ama aqbali kara cuntada ay ku deeqaan suuqa beeraleeyda ama si toos ah ugasoo iibsan kara beeraleeyda kadibna siin kara macaamiishooda, ardayda, ama macaamiishooda. Xaashida xaqiiqada: ayaa qeexaysa qaar kamid ah erayada soo noqnoqda waxayna jawaabo ka bixinaysaa qaar kamid ah su`aalaha inta badan la isweydiiyo oo ku saabsan sida xarumaha cuntadu u adeegsan karaan cuntada degaanka lagu beero si badqab leh oo sharci ah.

## Erayada

Erayada soo socda ayaa badanaa la adeegsadaa marka la qeexaayo xariirka u dhexeeya ganacsiyada beera ama sameeya cuntada iyo kuwa cuntada gaarsiiya dadwaynaha.

## Xarunta cuntada

Xarumaha cuntada waxaa ku jira goobaha cuntada, ganacsiyada iyo ururada khayriga ah sida:

- Maqaayadaha ama cunto diyaariyaasha
- Adeegga cuntada ee dugsiga ama daryeellada maalintii
- Isbitaallada, xarumaha daryeelka caafimaadka ama hay'adaha
- Xarumaha bulshada, kaniisadaha ama kaydadka/bakhaarada cuntada
- Dukaanada cuntada, dukaannada adeegsiga fudud ama iskaashatada
- Suuqyada cuntada ama miisaska cuntada ee ku meel gaarka ah
- Bakhaarada waawayn, foornooyinka ama cunto sameeyaasha jumlada iibiya iyo warshadaha cuntada

## Beeraleey

Beeraleeyda waxaa ku jiri kara:

- Beeraleeyda iyo beerayaasha
- Beeraha dugsiga ama bulshada
- Beeraha xarumaha cuntada

## Iibin

*"Iibin" iyo "Iib" waxaa looga jeedaa haynta, bixinta, ama bandhigida si loo iibsho, loo adeegsado, loo raro, loo wareejiyo, looga wada hadlo, loo xayiisiiyo, ama la iskugu badasho cunto; haynta cunto si loo iibsho, loo adeegsado, loogu gorgortamo, loo xayiisiiyo, ama la iskugu badasho cunto; kaydinta, soo saarida, beerida, war shadaynta, baakadaynta, iyo u haynta cunto si loo iibsho; qaybinta ama bixinta cunto; ama qaybinta ama waafajinta cunto fulinta shaqo cunto ama qaadista cunto deeq ah si loo raro cuntada haddii qof toos u wado ama qaabab kale loo qaado.* – Xeerarka Minnesota, cutubka 34A.01, qaybta. 12

## Goob la ansixiyay

Ganacsiyada jumlada iyo tafaariiqda ayaa leh shuruudo kaladuwan oo ku aadan meesha la ansixiyay. Halkaan

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Locally grown produce_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

waxaad ka helaysaa tusaalayaasha qaarkood ee shuruudaha:

- Jiko ama xarun cunto samayn oo la ogolaaday waa inay haysataa shahaadada xarunta oo sheegaysa ogolaansho kasoo baxay kormeerayaasha maxaliga ah ee dhismaha, tuubo gelinta, dabka, korontada, iyo aagaynta.
- Qalabka tafaariiqdu waa inuu buuxshaa heerarka NSF ama heerarka u dhigma ee ganacsiga.
- Xaruntu waa inay leedahay boos ku filan kaydinta maadooyinka cuntada, qalabka, agabka baakadaynta, iyo badeecooyinka diyaarsan.
- Xaruntu waa inay leedahay isha biyaha oo la ogolaaday iyo nidaamka bulaacada qaada iyo daawaynta wasaqda oo la ogolaaday.
- Qorshaha lasoo diray ayaa loo baahan yahay in la keeno ugu yaraan 30 maalmood kahor bilaabida dhismaha, dib u naqshadaynta wayn, ama dhalan rogida xarunta cuntada tafaariiqda ah.
- Haddii aad iibiso jumlo ama lagaa dhaafay shardiga ruqsada, goobta la ogol yahay waa inay buuxisaa shuruudaha Farsamooyinka Wanaagsan ee Wax soosaarka (GMPs).

# Su`aalaha inta badan la isweydiiyo

## Beeraleeydu ma noqon karaa il la ogol yahay?

Haa, xarumaha cuntada ayaa ka iibsan kara ama aqbali kara cuntada sida tooska ah uga timid qofka beeraleeyda ah haddii cuntada lagu beeray beer ama fagaag uu dagan yahay ama uu beertay qofka beeraleeyda ah. Beeraleeydu waa inay xaqiijiyaan in dhammaan cuntada ay iibshaan ama ku deeqaan ay waafaqsan tahay sharciyada quseeya. Doorarkaan waxaa ku jiri kara:

- Dhaqamada maamulida iyo samaynta cuntada si loo xaqiijiyo in cuntadu tahay mid badqabta, wada fiyoow, oon waxba lagu darin.
- Adeegsiga biyo la qaadan karo.
- Ayadoo la raacaayo GMPs waafaqsan, Farsamooyinka Wanaagsan ee Beeraha (GAPs), Sharciga Casriyaynta Badqabka Cuntada (FSMA) Xeerka Badqabka Cuntada.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan xeerarkaan, fadlan la xariir Minnesota Department of Agriculture ood ka helayso 651-201-6027.

## Ma laga doonayaa beeraleeyda inuu haysto ruqsada dadka cuntada ka shaqeeya si uu u iibsho ama ugu deeqo cuntadiisa?

Waxay ku xiran tahay xaalada.

Dadka iibsha ama ku deeqa cuntada kasoo go'da beer ama fagaag ay kiraysteen ama leeyihiin lagama doonaayo ruqsad. Tan waxaa ku jira cuntada guud ama midda la warshadeeyay ee aan ahayn tan beerta.

Xaaladahaan ayaa u baahan ruqsada qofka cuntada ka shaqeeya:

- Dadka ku dara maadooyinka cuntada beerta aan ahayn (ayna ku jirto cusbada) inta lagu jiro soo saarista cunto ayaa u baahan ruqsad.
- Dadka doonaaya inay iibiyaan ama ku deeqaan cunto aysan ayagu beerin ayaa u baahan ruqsad.
- Mararka qaar Ruqsada Bixiyaha Cuntada Guud ayaa sidoo kale loo baahan karaa (tusaale, haddii qofku cuntada ka iibsado beeraleey si uu dib ugusii gado).

Qof kasta oo soo saara, warshadeeya, ka shaqeeya, ama bixiya cunto, haddii uu u baahan yahay ruqsad iyo haddii kaleba, waa qasab inuu ku dhaqmo xeerarka kale ee badqabka cuntada iyo shuruudaha. Xog dheeraad ah oo ku saabsan ruqsada cuntada, badqabka cuntada, iyo

shuruudaha gaarka ah ee badeeco ama warshadaynta ayaa laga heli karaa Minnesota Department of Agriculture.

## Goorma ayaan u baahan nahay inaan adeegsado goobta la ansixiyay si aan cunto ugu sameeyo?

Goob la ogolaaday lagama doonaayo cunto samaynta lagu sameeyo goobta ama aaga baakadaynta, sida:

- Nidaaminta, ama dul saarida kaaroodka ama sabuulka oo qayb ka ah gurashada beerta gurida.
- Dhaqitaanka bilaabida shaqada qaboojinta ama in meesha la saaro ciida iyo wasaqda.

Goob la ansixiyay ayaa laga doonayaa warshadaynta dheeraadka ah, sida:

- Jarjarida, qasida ama duubista.
- Karinta, qasacaydaynta ama dhalo ku shubida.
- Barafaynta ama qalajinta.

Goob la ogolaaday IYO ruqsada cunto ka shaqeeyaha ayaa loogu baahan yahay:

- Ku darista maadooyinka beerta aan ahayn (ayna ku jirto cusbo) kahor isticmaalka ama iibinta.

## Waa maxay shaqada qofka masuuliyada leh (PIC) ama kormeeraha?

Qof kasta oo ka shaqeeya cunto wuxuu qayb ku leeyahay masuuliyada isticmaalka farsamooyinka maamulida cuntada oo badqab leh kuwaas oo yareeya suuragalnimada xanuun cuntada ka dhasha.

Xarunta cuntada ee tafaariiqda iibsha, PIC waa qasab inuu:

- Leeyahay aqoon gaar ah uuna buuxshaa waajibaad gaar ah si loo yareeyo suuragalnimada xanuun cuntada ka dhasha.
- Waa inuu kormeeraa mutadawiciinta bulshada ee ka caawin kara samaynta cuntada goob la ogolaaday (tusaale, waalidiinta ka shaqeeya jikada dugsiga si ay uga caawiyaan dhaqista iyo jarista kaaroodka lagu beeray beerta dugsiga).

Warshadaha cuntada sameeya, kormeerayaal hawlkar ah waa inay:

- Xaqiijiyaan ku dhaqanka farsamooyinka maamulida cuntada oo badqab leh.

## Waa maxay tilmaamaha kale ee iibsiga iyo qaadashada ee quseeya cuntooyinka deegaanka ka baxa?

- Waydii maamulka sharciyaynta ee gobalka ama kuwa maxaliga ah ee ruqsadeeyo oo kormeera xaruntaada kahor intaadan badalin noocyada cuntada ama balaarin ganacsigaaga si aad ugu soo darto cuntooyin ama qaabab qaabab cusub. Waxay kaa caawin karaan aqoonsiga tababarka dheeraadka ah, shahaadada, ruqsada iyo shuruudaha ogolaanshaha.
- Akhri qorshaha badbaadada Cuntada ee beeraleeyda, oo lagu baxshay qaab qoraal ah ama hadal ah, si aad uga hesho talaabooyinka abuurista, gurashada, maamulida, kaydinta, iyo rarista cuntada.
- Kormeer ku samee gaariga cuntada qaadaaya si aad u hubiso inuu nadiif yahay. Raadi jiritaanka kiimikooyin, ur iyo wasaq muuqata.
- Ka fiiri cuntada astaamaha cayayaanka, xanuun, nabaro, waxyeelo, mataatixid iyo inaysan bislaan.

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Locally grown produce_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

- Codso dukumiintiga tixraacaaya Wakaalada Cadayn bixinta ee USDA haddii cuntada loo xayiisiiyo inay tahay “mid nadiif ah.”
- Si fiican u dhaq cuntada si aad uga saarto ciida iyo sunta dusha saaran kahor intaan la isticmaalin.
- Codso risiidka iibka oo meel fiican dhigo. Diiwaan haynta wanaagsan ayaa si gaar ah muhiim u ah haddii xanuun ama dhaawac uu muhiim ka dhigo baahida tixraaca cuntada oo lagu xiraayo soo saaraha.
- Beeraleeyda ka shaqeeya cuntadooda si ay u iibshaan ayaa codsan kara kormeer ay samayso Minnesota Department of Agriculture. Iibsadayaasha ayaa codsan kara koobiga warbixinta kormeerka.

## Waa maxay noocyada dukumiintiyada xarumaha cuntada laga rabo inay ka helaan beeraleeyda?

Xarumaha cuntadu waa inay helaan risiid sheegaaya xogta soo socota:

- Taariikhda cuntada la keenay
- Magaca qofka helay
- Lagu deeqay ama la iibsaday
- Qeexitaanka iyo cadadka cuntada
- Taariikhda la guray
- Meesha lagasoo guray
- Magaca beeraleeyda
- Ciwaanka
- Taleefoonka
- Ciwaanka iimeelka

## Macluumaadka

[FSMA Final Rule for Preventive Controls for Human Food | FDA]

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Locally grown produce_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health